Ku dhaqan Xafiis D.

# Faafinta Rasmiga ah
# الجريدة الرسمية
# Official Bulletin

## EE JAMHUURIYADDA SOOMAALIYA

**Sanadka 11aad** **Muqdisho, APRIL 2024** **Lr. 2**

**Waaxda Maamulka Faafinta Rasmiga ah**
**Ee Xafiiska Garyaqaanka Guud ee Dawladda**

## FAAFIN BILAHA SOO BAXA

Qiimaha waa $XXX Dollar, lambar waliba – **RUKUNKA**: Sanaddii waa $XXX Dollar, Soomaaliya gudaheeda – Dibaddeedana waa $XXX Dollar.

Rukunka la weydiisto waqtiga loo gooyay wuxuu ka bilaabmaa 1 Janaayo. Qiimaha Qoritaanku F.R halkii sadar iyo wixii ka yar waa $XXX Dollar – Rukunka iyo Qoritaanku waxaa la weydiistaa Laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah – Lacagta waxaa lagu bixiniyaa Xafiiska Canshuuraha ee Wasaaradda Maaliyadda.

# KOBNIIN

**BOGGA KOOWAAD**

**SHARCI**

W.M

**BOGGA LABAAD**

XEER

**BOGGA SEDDEXAAD**

**TALOOYIN, ISGAARSIIN, OGAYSIIS, IWM**

## BILAHA

## FEBRUARY-MARCH

# 2024

MADAXWEYNAHA JFS
BIYID / SENT
27 MAR 2024
SAACAD ______ SAXIIX ______

**SHARCI LR. 18** **TAARIIKH: 13 FEBRAAYO 2024**
**SHARCIGA QAXOOTIGA & MAGANGELYO DOONKA**

**MADAXWEYNAHA J.F.S,**

| | |
|---|---|
| **MARKUU ARKAY:** | Qodobka 87aad, Faqradda 1aad iyo Faqradda 2aad ee Dastuurka KMG. |
| **MARKUU ARKAY:** | Qodobka 90aad, Xarafka "F" ee Dastuurka KMG. |
| **MARKUU ARKAY:** | Warqadda Guddoomiyaha Golaha Shacabka ee summaddeedu tahay **XGGSH/0483/B11/24**, ku taariikheysan **24/01/2024**, ujeeddaduna tahay Soo Gudbin Hindise Sharciyeedka''Qaxootiga iyo Magangelyo Doonka''. |
| **MARKUU TIXGELIYAY:** | Baahida loo qabo in la meel mariyo sharcigan. |

**Waxa uu Madaxweynuhu soo saaray sharcigan:**

**Qodobka 1aad**

Laga billaabo marka uu Madaxweynuhu saxiixo Sharcigan, waxaa si rasmi ah loo oggolaaday Sharciga Qaxootiga iyo Magangelyo Doonka.

**Qodobka 2aad**

Marka uu Madaxweynaha J.F.S. saxiixo Sharcigan, waxa lagu soo daabici doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA HANTIDHOWRKA GUUD
DIIWAAN NO: HAN-34-2024
TAARIIKH: 01-04-2024
SAXIIX:
AVV Ahmed Isse Gutale
Hantidhowraha Guud Ee JFS

**Madaxweynaha J. F.S.**
**Mudane Dr. Xasan Sheekh Maxamuud**

**Jumhuuriyadda Federaalka ee Soomaaliya**
**Golaha Shacabka**
**Xafiiska Guddoomiyaha**

**جمهورية الصومال الفيدرالية**
**مجلس الشعب**
**مكتب الرئيس**

**Federal Republic of Somalia**
**House of the People**
**Office of the Speaker**

**Tix: XGGSH/0483/B11/24:الرقم** **Muqdisho, Janaayo 24, 2023 التاريخ**

**Ku: -** **Madaxweynaha Jumhuuriyadda Federaalka Soomaaliya**

**Ujeeddo: -** **Soo Gudbin Hindise Sharciyeedka "Qaxootiga iyo Magangelyo Doonka"**

M.ne Madaxweyne;

Waxaan si waafaqasan Qodobka 82aad Faqaradda 3aad ee Dastuurka KMG halkan kuugu soo gudbinaynaa Nuqulka Rasmiga ah ee Hindise Sharciyeedka Qaxootiga iyo Magangelyo Doonka oo Golaha Shacabka iyo Aqalka Sare mid walba gaarkiisa u soo ansixiyey.

Hindise Sharciyeedka Qaxootiga iyo Magangelyo Doonka wuxuu Golaha Shacabka soo gaaray taariikhdu markay aheyd 16/05/2023 wuxuuna maray dhammaan habraacyada kala duwan ee akhrinta 1aad, 2aad iyo 3aad. Golaha Shacabka wuxuu si waafaqsan Qodobka 82(1)(a) ee Dastuurka KMG ansixiyey hindise-sharciyeedkan 13/09/2023 isla markaana waxaa loo gudbiyey Golaha Aqalka Sare si ay waajibaadkooda Dastuuriga ah uga gutaan. Golaha Aqalka Sare wuxuu dhankiisa ansixiyey isla nuqulkii Golaha Shacabka oo aan waxba laga beddelin si waafaqsan Qodobka 82(2)(a) ee Dastuurka KMG, waxayna dib ugu soo celiyeen Golaha Shacabka 18/01/2024.

Haddaba, M.ne Madaxweyne, waxaan si waafaqasan Qodobka 90(f) ee Dastuurka KMG kaaga codsanaynaa in aad Hindise Sharciyeedka Qaxootiga iyo Magangelyo Doonka ku meelmariso Xeer Madaxweyne, si loogu soo saaro Faafinta Rasmiga ah ee Jumhuuriyadda una noqdo sharci, si waafaqsan Qodobbada 84aad iyo 85aad ee Dastuurka KMG.

Naga Guddoon Salaan Qiimo Badan.

**M.ne Sheekh Aadan Maxamed Nuur "Madoobe"**
**Guddoomiyaha Golaha Shacabka BJFS**

Og: Ra'iisul Wasaaraha Xukuumada Federaalka.
Og: Guddoomiyaha Aqalka Sare.
Og: Garyaqaanka Guud ee Dawladda.
Og: Hantidhowrka Guud Qaranka.
Og: Xoghayaha Guud ee Golaha Shacabka.
Og: Waaxda Shuruucda Golaha Shacabka.

Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya
Golaha Aqalka Sare ee BFS
Xafiiska Guddoomiyaha

جمهورية الصومال الفيدرالية
مجلس الشيوخ
مكتب الرئيس

Federal Republic of Somalia
The Upper House
Office of The Speaker

Tix: XG/1022/B-10/22

Taariikh: 18/01/2024 التاريخ

Ku:- Guddoomiyaha Golaha Shacabka BFS =Muqdisho=
Og:- Guddiga Arrimaha Gudaha Aqalka Sare =Muqdisho=
Og:- Wasaaradda Arrimaha Gudaha XFS =Muqdisho=
Og:- Xafiiska Garyaqaanka Guud ee Dowladda =Muqdisho=
Og:- Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya =Muqdisho=

**Ujeeddo: Soo Gudbin Qaraar Gole (Ansixinta Sharciga Qaxootiga iyo Magangalyo-doonka)**

Mudane Guddoomiye,

Salaan diirran ka dib, waxaan kuu soo gudbinayaa Qaraarka Golaha Aqalka Sare ee Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya ee tirsigiisu yahay **Tix: GAS/B-11/KF4/16/2024** kuna taariikheysan **16[ka] Jannaayo, 2024** uuna Goluhu ku ansixiyay **Sharciga Qaxootiga iyo Magangalyo-doonka:**

- Waxaa soo xaadiray: **28 Senatar.**
- Waxaa codeeyay: **28 Senatar.**
- Waxaa oggolaaday: **28 Senatar.**
- Waxaa diiday: **0 Senatar.**
- Waxaa ka aamusay: **0 Senatar.**

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
GOLAHA SHACABKA
TAR: 20-1-2024
TIX: 154
SAXIIX: Maxamed Ibrahim
GELID

Sidaas darteed, Mudane Guddoomiye, waxaa halkan ku lifaaqan Qaraarka Golaha Aqalka Sare ee kor ku xusan iyo nuqulka sharciga ee uu Goluhu soo ansixiyay si aad uga gudataan waajibka dastuuriga ee la idiin igmaday.

Iga guddoon qadarin.

**Sen. Cabi Xaashi Cabdullaahi**
**Guddoomiyaha Golaha Aqalka Sare**
**Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya**

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE
AQALKA SARE

# ANSIXINTA SHARCIGA QAXOOTIGA IYO MAGANGALYO-DOONKA

| Senatarrada Codeeyay | Oggolaaday | Diiday | Ka Aamusay |
|---|---|---|---|
| 28 | 28 | 0 | 0 |

| Guddoomiyaha Golaha Aqalka Sare ee Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya | |
|---|---|
| Sen. Cabdi Xaashi Cabdullaahi | Taariikh: 16 Jannaayo, 2024 |

| Guddoomiye Ku-xigeenka Koowaad ee Golaha Aqalka Sare Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya | |
|---|---|
| Sen. Cali Shacbaan Ibraahim | Taariikh: 16 Jannaayo, 2024 |

| Guddoomiye Ku-xigeenka Labaad ee Golaha Aqalka Sare Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya | |
|---|---|
| Sen. Cabdullaahi Cali Xirsi | Taariikh: 16 Jannaayo, 2024 |

# JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA

## GOLAHA AQALKA SARE
## BAARLAMAANKA FEDERAALKA SOOMAALIYA

# QARAAR GOLE
# ANSIXINTA SHARCIGA "QAXOOTIGA IYO MAGANGALYO-DOONKA"

**Muqdisho,**
**16 Jannaayo, 2024**

**Tix:** GAS/B-11/KF4/16/024

Kalfadhiga $4^{aad}$

Kulankiisa $6^{aad}$

**Taariikh: 16 Jannaayo, 2024**

**GOLAHA AQALKA SARE EE BAARLAMAANKA FEDERAALKA SOOMAALIYA**

**MARKUU AKHRIYAY:**

Sharciga **"Qaxootiga iyo Magangalyo-doonka"** oo ay nuqulkiisii kowaad soo curisay Xukuumadda Federaalka Soomaaliya uuna soo ansixiyay Golaha Shacabka ee Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya soona gaaray Golaha Aqalka Sare **16 Sebteembar, 2023,** si uu uga guto waajibka dastuuriga ah ee loo igmaday.

**MARKUU ARKAY:**

**Qod.**$82^{aad}$ iyo **Qod.**$83^{aad}$ ee Dastuurka KMG ah iyo **Qod.**$50^{aad}$ iyo **Qod.**$51^{aad}$ **(4)** ee Xeer Hoosaadka Golaha Aqalka Sare.

**MARKUU ARKAY:**

**Qod.**$61^{aad}$ **(1) (3)** ee Dastuurka KMG ah.

**MARKUU TIXGELIYAY:**

Sida wanaagsan ee uu Guddiga Arrimaha Gudaha, Dib-u-heshiisiinta, Arrimaha Federaalka iyo Xiriirka Dowladaha Xubanaha ka ah Dowladda Federaalka ee Golaha Aqalka Sare uga soo shaqeeyay **Sharciga Qaxootiga iyo Magangalyo-doonka.**

**MARKUU GAROWSADAY:**

In danta guud ee Dalku ku jirto meel marinta Sharciga **Qaxootiga iyo Magangalyo-doonka.**

**ISAGA OO KU KULANSAN:**

Kalfadhiga **$4^{aad}$**, kulankiisa **$6^{aad}$**, oo ay soo xaadireen **28 Senatar** (sideed iyo labaatan Senator).

## WUXUU GUDDOONSADAY QODOBADA HOOS KU XUSAN:

### Qod.1aad
### ANSIXINTA SHARCIGA

Golaha Aqalka Sare wuxuu cod aqlabiyad leh ku ansixiyay Sharciga **Qaxootiga iyo Magangalyo-doonka** isaga oo wax-ka-beddel ku sameeyay.

### Qod.2aad

### GUDBINTA QARAARKA GOLAHA AQALKA SARE

Qaraarka Golaha Aqalka Sare waxaa loo gudbinayaa Golaha Shacabka ee Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya.

**Sen. Cabi Xaashi Cabdullaahi**
**Guddoomiyaha Golaha Aqalka Sare**
**Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya**

Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya
Golaha Shacabka
Xafiiska Guddoomiyaha

جمهورية الصومال الفيدرالية
مجلس الشعب
مكتب الرئيس

Somali Federal Republic
The House of the People
Office of the Speaker

Ref: XGGSH/ 644 /B-11/23 :الرقم

Mogadishu, September 13, 2023: التاريخ

**Ku:** Guddoomiyaha Aqalka Sare.
**Og:** Ra'iisal Wasaaraha Xukuumada JFS.
**Og:** Guddiga Arrimaha Gudaha, Maamulada Gobolada & Amniga.
**Og:** Wasaaradda Arrimaha Gudaha, Federaalka & Dibuheshiisiinta.
**Og:** Xoghayaha Guud ee Golaha Shacabka.
**Og:** Waaxda Shuruucda ee Golaha Shacabka.

**UJEEDO: ANSIXINTA HINDISE SHARCIYEEDKA QAXOOTIGA IYO MAGANGALYO DOONKA**

Mudane Guddoomiye,

Waxaan halkan kugu soo gudbinaynaa Hindise Sharciyeedka Qaxootiga iyo Magangalyo Doonka, kadib markii xildhibaannada Golaha Shacabka kulankoodii 26aad ee kalfadhiga 3aad ay ku ansixiyeen si waafaqsan qodobka 69 farqadiisa (1)(a) ee Dastuurka KMG Soomaaliya, taariikhdu markay ahayd 13ka Sebteembar 2023, codayntuna sidaan hoose ayay u dhacday:

| | |
|---|---|
| **Koramka:** | **141** |
| **Oggol:** | **134** |
| **Diiday:** | **1** |
| **Ka aamustay:** | **6** |

Hadaba, Mudane Guddoomiye waxaan si waafaqsan Qodobka 82(1)(a) ee Dastuurka KMG halkan idinku soo gudbinaynaa Hindisihan si waajibaadkiina Dastuuriga ah aad uga gudataan.

Naga guddooma Salaan diiran iyo qadarin gaar ah.

**M.ne Sheikh Adan Mohamed Nur - Madoobe**
**Guddoomiyaha Golaha Shacabka BJFS**

Tell: +252 616641550/+252 618153111
E-mail. speaker@parliament.gov.so
Website: www.parliament.gov.so

# ANSIXINTA HINDISE SHARCIYEEDKA QAXOOTIGA IYO MAGANGALYO DOONKA

| |
|---|
| **Tirada Xubnaha Codeysay: 141** |
| **Oggol: 134;** |
| **Diiday: 1;** |
| **Ka Aamustay: 6;** |

| **Guddoomiyaha Golaha Shacabka BJFS** | |
|---|---|
| **M.ne. Sheikh Adan Mohamed Nur - Madoobe** | **Tar: 13/09/2023** |

| **Guddoomiye K/Xigeenka 2aad ee Golaha Shacabka BJFS** | |
|---|---|
| **M.ne. Abdullahi Omar Abshirow** | **Tar: 13/09/2023** |

| **Ku-Simaha Xoghayaha Guud ee Golaha Shacabka BJFS** | |
|---|---|
| **M.ne Maxamed Cabdullaahi Cabdi - Ciyow** | **Tar: 13/09/2023** |

Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya
Xafiiska Ra'iisul Wasaaraha

جمهورية الصومال الفيدرالية
مكتب رئيس الوزراء

The Federal Republic of Somalia
Office of the Prime Minister

Tixraac:XRW/0155/0/2023

Taariikh: 20/03/2023

XRW - BIXIT
29 MAR 2023
OPM - EXIT

**Ku: Guddoonka Golaha Shacabka JFS** **=Muqdisho=**

**Og: Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya** **=Muqdisho=**

**Ujeeddo: <u>Soo Gudbin Hindise-sharciyeedka Qaxootiga iyo Magangelyo Doonka</u>**

**Mudane Guddoomiye,**

Iyada oo la tix-raacayo Go'aanka Shirka Golaha Wasiirrada ee summaddiisu tahay **SHGW.00.25.03.23 ee 20/03/2023**, kuna saabsan ansixinta **"Hindise-sharciyeedka Qaxootiga iyo Magangelyo Doonka"** oo uu Goluhu cod aqlabiyad leh ku ansixiyey.

Sidaa awgeed, Mudane Guddoomiye, waxa aan halkan idin-kugu soo gudbineynaa **"Hindise-sharciyeedka sare ku xusan"** si aad uga gudataan waajibaadkiina Dastuuriga ah, waxa aan idinka codsaneynaa in aad fududeysaan ansixinta **"Hindise-sharciyeedka Qaxootiga iyo Magangelyo Doonka"** maadaama baahi weyn loo qabo meel-marintiisa.

**Xiriir iyo wada shaqeyn wacan.**

**Mudane. Hamza Cabdi Barre**
**Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda JFS**

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
GOLAHA SHACABKA
TAR: 16-5-2023
TIX: 73
SAXIIX:
GELID

Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya
Xafiiska Ra'iisul Wasaaraha

جمهورية الصومال الفيدرالية
مكتب رئيس الوزراء

The Federal Republic of Somalia
Office of the Prime Minister

**Tixraac:XRW/122 /03/2023** **Tariikh: 20/03/2023**

**Ku: Wasaaradda Arrimaha Gudaha, Federaalka iyo Dib u Heshiisiinta =Muqdisho=**
**Ku: Dhammaan Xubnaha Golaha Wasiirrada =Muqdisho=**
**Og: Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya =Muqdisho=**

XRW - BIXIT
29 MAR 2023
OPM - EXIT

**Ujeeddo: Go'aan Gole, "Ansixinta Hindise-sharciyeedka Qaxootiga iyo Magangelyo Doonka.**

**Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda JFS,**

**MARKUU ARKAY:** Qodobka 80aad farqadda 1 aad (a) ee Dastuurka KMG ah.

**MARKUU ARKAY:** Qodobka 99aad farqadaha (a), (b), (c) iyo (e) ee Dastuurka KMG

**MARKUU ARKAY:** Qodobka 100aad farqadaha (a) iyo (d) ee Dastuurka KMG

**MARKUU ARKAY:** Warqadda summadeedu tahay **WAGF&D/292** ee ku taariikheysan Febraayo 20, 2023 kuna saabsan codsi soo-jeedin Wasiirka Wasaaradda Arrimaha Gudaha, Federaalka & Dib u Heshiisiinta

**MARKUU ARKAY:** Go'aanka Golaha Wasiirrada ay ku meel-mariyeen "**Hindise-sharciyeedka Qaxootiga iyo Magangelyo Doonka"** Shirka summaddiisu tahay **SHGW.025.03.23** kuna taariikheysan **20/03/2023,** Kaasoo uu Goluhu cod buuxa ku ansixiyey.

**MARKUU TIXGELIYAY;** Mudnaanta uu dalka iyo dadka u leeyahay Hindise-sharciyeedka Qaxootiga iyo Magangelyo Doonka

**Wuxuu Meel-mariyey:**

**Qodobka 1aad**

**Go'an gole**

Go'aanka Shirka Golaha Wasiirrada ee summaddiisu tahay **SHGW.025.03.23** ee **20/03/2023,** kuna saabsan ansixinta **Hindise-sharciyeedka Qaxootiga iyo Magangelyo Doonka** oo uu Goluhu cod buuxa ku ansixiyey.

**Qodobka 2aad**

**Gudbin**

In si deg deg ah loogu gudbiyo Golaha Shacabka **"Hindise-sharciyeedka Qaxootiga iyo Magangelyo Doonka."** si ay uga gutaan waajibaadkooda dastuuriga ah.

**Mudane, Hamza Cabdi Barre**
**Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda JFS**

Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya
Wasaaradda Arrimaha Gudaha,
Federaalka & Dib u Heshiisiinta
Xafiiska Wasiirka

جمهورية الصومال الفيدرالية
وزارة الداخلية،والشؤون الفيدرالية والمصالحة
مكتب الوزير

Federal Republic of Somalia
Ministry of Interior, Federal Affairs & Reconciliation
Office of the Minister

**Ref: WAGF&D/XW/1292/2023**

**Tar: February 20, 2023**

Ku: Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda JFS =Muqdisho=
Og: Garyaqaanka Guud ee Dowladda =Muqdisho=

**Ujeeddo: Hindise Sharciyeedka Qaxootiga Iyo Magan Galyo Doonka, 2023**

**Mudane R/Wasaare;**

Markii aan arkay: Qodobka 99aad, faqradiisa (c) iyo Qod. 102, faq.1. ee Dastuurka KMG ah ee JFS.

Markii aan arkay: Sharciga Lr. 30 ee 30kii Luulyo, 1984, ee Dhismaha Wasaaradda Arrimaha Gudaha.

Markii aan garwaaqsaday: Baahida Loo qabo in La helo Sharcigaan si loo sugo loona ilaaliyo Xaquuqda Iyo Waajibaadka Qaxootiga Iyo Magan Galyo Doonka Dalka, Loona Dhiso Guddiyo qaabilsan howlaha la xariira qaxootiga.

**Mudane R/Wasaare;**

Waxaan halkan kuugu soo gubinayaa kuuguna soo lifaaqayaa Hidise sharciyeedka ujeedada sare ku xusan oo ah Hidise sharciyeedka Qaxootiga iyo Maggan galyo doonka, 2023. waxaanna kaa codsaneeynaa in aad naga aqbasho Hindise Sharciyeedkan si loo horgeeyo Golaha Wasiirada JFS, ka dibna loogu gudbiyo Barlamaankaa FJS.

Naga Guddoon Salaan iyo Mahad celin badan

**Amb. Axmed Macallin Fiqi**
**Wasiirka Wasaaradda**

WASAARADDA ARRIMAHA GUDAHA, FEDERAALKA & DIB-U-HESHIISIINTA
20 FEB 2023
BIXID / EXIT

Address: 888 Building, Via Tanzania, Off Makka Almukarrama Road Tell: +252-865929 info@moifar.gov.so, www.moifar.gov.so

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA

# SHARCIGA QAXOOTIGA IYO MAGANGALYO DOONKA

## CUTUBKA 1AAD: QODOBBO HORDHAC AH

### Qodobka laad:
### Magaca Sharciga

Sharcigan Waxaa lagu Magacaabaa Sharciga Qaxootiga iyo Magangalyo Doonka.

### Qodobka 2aad:
### Awoodda soo saarista iyo Baaxadda Dhaqan-galka

Sida uu dhigayo Qodobka 37 (2) ee Dastuurka KMG, Barlamaanka Federaalka Soomaaliya ayaa soo saarayaa Sharciga Qaxootiga oo laga hirgalin doono Jamhuuriyadda federaalka Soomaaliya dhammaan dhulkeeda, Badda iyo Berrigaba, Sharcigaas oo nidaaminaya arrimaha la xiriira qaxootiga iyo magangelyo-doonka.

### Qodobka 3aad:
### Eray-bixin

Erayada halkan ku xusan waxaa loo micnaynayaa sida soo socota haddii aan si kale loogu qeexin Sharcigan dhexdiisa:

1. "Golaha Rafcaanka" waxaa loola jeedaa Golaha Rafcaanka ee Qaxootiga lagu dhisay Qodobka 32aad ee Sharcigan.
2. "Codsade" waxaa loola jeedaa qof codsi u soo gudbiyay si waafaqsan Sharcigan si loogu aqoonsado loona ilaaliyo magangelyo-doon ama qaxooti ahaan.
3. "Magangelyo" waxaa loola jeedaa in gabbaad iyo ilaalin ay Dowladda Federaalka ah siiso shakhsiyaadka qaxootinimo loogu aqoonsan karo si waafaqsan qodobbada Sharcigan iyo si waafaqsan Heshiisyada Caalamiga ah ee la xiriira aqoonsashada iyo ilaalinta magangelyo-doonka iyo qaxootiga.
4. "Magangelyo-doon" waxaa loola jeedaa qof sababo siyaasadeed, dagaal ama dhibaateyn uga soo taga dalkii uu caadi ahaan degganaa oo u soo safra Soomaaliya si uu u helo gabbaad, ilaalin iyo qaxootinimo, si waafaqsan sharcigan.
5. "Carruur/ubad" waxaa uu la mid yahay macnaha lagu siiyey Qodobka 29 (8) ee Dasuurka.
6. "Maxkamad" waxaa loola jeedaa Maxkamadda Sare ee heer Federaal taas oo ah Maxkamadda ugu Saraysa Dalka ee Heer Federaal, sida ku cad Qodobka 108 ee Dastuurka.
7. "Hay'adda/Commission" waxaa loola jeedaa Hay'adda Qaxootiga iyo Barakacayaasha Qaranka ee lagu dhisay Sharci Lr.02 ee soo baxay 21/02/2016
8. "Madaxa Hay'adda/Commissioner" waxaa loola jeedaa Guddoomiyaha Guddiga Maamulka iyo Sarkaalka ugu Sarreeya ee Fulinta ee Hay'adda



JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA

Qaxooti iyo Barakacayaasha Qaranka.

9. "Guddi/Committee" waxaa loola jeedaa Guddiga Go'aaminta Xaaladda Qaxootinimo ee lagu dhisay Qodobka 27aad.
10. "Dalkii uu horey caadi ahaan uu u degganaa" waxaa loola jeedaa dalka uu si joogto ah u degganaa, oo uuna ku haystey ilaalin.
11. "Dalka uu dhalashadiisa haysto" marka laga hadlayo qof haysta dhalashada wax ka badan hal dal, waxaa loola jeedaa mid kasta oo ka mid ah dalalka uu qofkaas dhalashada ka haysto.
12. Xubnaha qoyska" waxaa loola jeedaa:
    - (b) Xaaska/ninka ama xaasaska qof qaxooti ah.
    - (t) Ilmo kasta oo uu masuul ka yahay, walaalka ama walaasha qofka qaxootiga ah kaas oo ay da'diisu ka yar tahay toban iyo siddeed sano.
    - (j) Awoowe, ayeeyo, waalid, ilmo uu awoowe u yahay, oo qofka qaxootiga ah kula nool halka uu deggan yahay mas'uulna uu ka yahay.
13. Koox waxaa loola jeedaa: dad la cararay cabsi maangal ah kuwaas oo aan lid ku aheyn diinta Islaamka, dhaqanka Soomaaliyeed iyo Shuruucda Dalka.
14. "Qaxooti" waxaa loola jeedaa shakhsi ama koox la cararaya/cararaysa cabsi sal leh oo ah in lagu waxyeelaynayo sabab la xariirta: midab, diin, dhalasho, ka mid noqosho koox ama urur siyaasadeed, kaas oo dibedda ka jooga dalkii uu u dhashay, awoodin ama haysan ilaalinta dalkii uu u dhashay; qofkaas oo aan haysan degenaansho, joogana dal dibedda ka ah kii uu u dhashay oo ay hay'ad awood u leh ugu aqoonsatay si waafaqsan xeerkan ama si waafaqsan sharciga xuquuqul-insaan oo caalami ah ama mid goboleed oo la xiriira xaaladda qaxootinimo kaasoo ay tahay in ay u hoggaansanto Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.
15. "Xeer-nidaamiyeyaal" waxaa loola jeedaa Xeer-nidaamiyeyaal uu dejiyo Wasiirka Arrimaha Gudaha oo hoos imaanaya Sharcigan.
16. "Dastuurka" waxaa loola jeedaa Dastuurka Ku-meelgaarka ah ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya 2012.

## Qodokba 4aad: Ujeedada Sharciga

Ujeeddada Sharcigan waa in:

1. Uu noqdo xeer iyo qaanuun guud oo loo adeegsado aqoonsashada iyo ilaalinta qaxootiga iyo magangelyo doonka; iyo
2. Lagu saleeyo Shuruucda Guud ee loo adeegsanayo aqoonsashada, ilaalinta iyo maareynta qaxootiga iyo magangelyo- doonka.

## Qodobka 5aad:
## Mabaa'diida Hagaysa

Aqoonsashada iyo ilaalinta qaxootiga iyo magangelyo-doonka ee Sharcigan dhexdiisa



JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA

waxaa hagi doona mabaa'diidan soo socata:

1. Ixtiraamidda karaamada asalka ah, madax-bannaanida shakhsi ahaaneed, oo ay ka mid tahay in uu qofku xor u ahaado go'aansashada waxa uu doonayo, madax-bannaanida shakhsiyaadka.
2. Sinnaan iyo takoor la'aan.
3. Ixtiraamidda kala duwanaanshaha iyo aqbalidda shakhsiyaadka anaafada ah
4. Waa in si weyn loo tixgliyaa sida danta ugu wanaagsan ay ugu jirto carruurta.
5. Mid-ahaanshaha qoyska.
6. In aan khasab lagu celin Karin iyo
7. Iskaashi caalami ah oo laga yeesho arrimaha la xiriira magangelyada iyo dib-u-dejinta.
8. Waafaqsanaanta dhaqanka Soomaaliyeed iyo Shuruucda Dalka.

## CUTUBKA 2AAD: AWOODAHA SHARCI, XUQUUQAHA İYO WAAJIBAADYADA KU SAABSAN ARRIMAHA LA XIRIIRA MAGANGELYO-DOONKA İYO QAXOOTIGA

### Qodobka 6aad:
### Awoodda Bixinta Magangelyada ama Qaxootinimada

1. Dowladda Federaalka Soomaaliya ayaa Sharcigan u siinayaa awood ay u madax bannaan tahay oo magangelyo ama qaxootinimo ku siiso ama ugu diiddo qof kasta ama shakhsiyaad kasta oo tilmaamo gaar ah wadaaga.
2. Go'aan kasta oo ay Dowladda Federaalka ah iyada oo adeegsaneysa awooddeeda ay magangelyo ama qaxootinimo ku siiso qof ama shakhsiyaad tilmaamo gaar ah wadaaga si waafaqsan Sharcigan waa fal nabadgelyo iyo mid bani'aadamnimo, waana in aanu qof ama dal u fasiran mid isaga lagu colaadinayo, ama in uu yahay fal cadaawad ama gardarro ay waddo Dowladda Federaalka ah.

### Qodobka 7aad:
### Waajibka Hay'adda Ka Saaran in ay Iskaashi La Sameyso Hay'adda Qaramada Midoobay ee Qaxootiga

Hay'addu iyadoo gudanaysa hawsheeda sida uu dhigayo Sharcigan, waxay iskaashi la yeelanaysaa Hay'adda Qaramada Midoobay ee Qaxootiga.

## CUTUBKA 3AAD: HABRAACA SOO CODSASHADA, GO'AAMINTA İYO U AQOONSASHADA QAXOOTINIMADA

### Qodobka 8aad: Soo-codsashada Qaxootinimada

1. Qof kasta ayaa qaxootinimo u soo codsan kara si waafaqsan Sharcigan haddii uu qofkaas dhex joogo dhulka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.



JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA

2. Qof kasta oo soo gala Soomaaliya oo doonaya in uu dalka ku joogo qaxootinimo si waafaqsan Sharcigan, waa in islamarka uu soo galo Soomaaliya ugu dambeyn soddon maalmood gudahooda oo ka bilowda taariikhda uu soo galay asagoo tagaya hay'addaha soo socdo midkood:
   (b) Saldhigyadda ama baraha kontorool ee Booliska uu leeyahay.
   (t) Xarumaha hay'adda Qaxootiga Qaranka.
   (j) Xarumaha Hay'adda Socdaalka iyo Jinsiyadaha Soomaaliya.

3. Mid kasta oo ka mid ah Hay'addaha lagu cayimay faqradda Labaad (2), oo qofka codsi soo gudbinaya uu u yimaado oo uu ogeysiiyo in uu doonayo in uu soo codsado magangelyo si waafaqsan Sharcigan, waa in uu sida uu dhaqsida badan ee suuragalka ah codsadaha ugu soo diraa xafiiska Hay'adda ee ugu dhaw si uu u soo gudbiyo codsi rasmi ah oo uu ku codsanayo magangelyo.
4. Marka loo soo diro Hay'adda iyada oo la raacayo faqradda (3), Madaxa Hay'adda waa in uu —
   (b) Codsadaha kaar ama waraaq aqoonsi qaxootinimo ugu sameeyaa qaabka loogu talagalay taas oo caddaynaysa in uu yahay magangelyo-doon;
   (t) Codsadaha uu, isaga oo adeegsanaya luuqad uu fahmayo, ogeysiiyaa xuquuqaha iyo mas'uuliyadaha uu ku leeyahay Sharcigan dhexdiisa;
   (j) Codsadaha siiyaa macluumaadka iyo hagitaanka lagama maarmaanka ah ee la xiriira habraaca loo marayo codsiga qaxootinimada
   (x) Codsadaha siiyaa macluumaad la xiriira joogitaanka iyo halka uu Soomaaliya kaga yaallo xafiiska ugu dhow ee Hay'adda Qaramada Midoobay ee Qaxootiga; iyo
   (kh) Haddii ay lagama maarmaan tahay, codsadaha uu gacan ka siiyaa la xiriirridda wakiil matalaya Hay'adda Qaramada Midoobay ee Qaxootiga.

5. Codsiga lagu codsanayo magangelyada uu dhigayo Sharcigan waa in uu u qornaadaa qaabka loogu talogalay, waana in ay ku jirtaa bayaan sheegaya in macluumaadka ku jira codsiga run yahay.

## Qodobka 9aad:
## Xaq-u-lahaanshaha in La Dhegeysto

Ka-hor inta aan go'aan laga gaarin codsi kasta, Guddiga Go'aaminta Qaxootinimada waa in codsadaha siiyaa fursad lagu dhegeysto waana in haddii ay lagama maarmaan tahay ay siisaa turjumaan.

## Qodobka 10aad:
## Mamnuucidda in Xaaladaha Qaar Tallaabo Sharci ah Laga Qaado Codsadaha

1. Waa in qof kasta ama xubin kasta oo qoys ka tirsan aan tallaabo sharci ah looga qaadin sabab la xiriirta in uu sharci-darro ku joogo Soomaaliya: --



JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA

(b) Haddii qofka uu soo gudbiyey codsi rasmi ah sida uu dhigayo Qodobka 8aad oo uu ku codsanayo in loo aqoonsado qaxootinimo, illaa go'aan laga gaaro codsiga, halka ay ku habboon tahayna, qofkaasi ka soo dhammeysto Xuquuqda Racfcaan ee uu dhigayo Qodobka 31aad; ama

(t) Haddii qofka noocaas ah noqdo qaxooti.

**Qodobka 11aad:**
**Shuruudaha U-aqoonsashada Qaxootinimada**

1. Qofka waxaa qaxootinimo loo aqoonsan karaa haddii: —
   (b) Ay jirto cabsi muuqata oo ah in uu la kulmayo ciqaab ku saleysan sinji, diin, dalka uu u dhashay, sababtoo ah asagoo kasoo jeedo koox, bulsho ama la yimid fikir siyaasadeed, asagoo ka waayey ilaalin ku filan naftiisa, maalkiisa iyo xuquuqdiisa.
   (t) Weerar uu dal kale ku soo qaadey, qabsasho, xukun shisheeye ama dhacdooyin kale oo carqaladeeya kala-dambeyntii guud ahaan ama qayb kamid ah dalka uu ka soo jeedo ama dhalashadiisa haysto, uu qofku ku khasbanaado in uu ka tago dalka uu caadi ahaan u degganaa si uu magangelyo uga doonto dal ka baxsan dalkii uu asal ahaan ka soo jeeday ama uu dhalashadiisa haysto; ama
   (j) Qofka qaxootinimo loogu aqoonsaday waajib ka dhashey heshiis ay qayb ka tahay Dowladda Federaalka Soomaaliya, ama sharci dhaqangal ka ah Soomaaliya ka hor intii aanu bilaaban Sharcigan.

2. Marka uu qofku haysto dhalahsada dalal mid ka badan, ereyga "dalka uu u dhashay" waxaa loola jeedaa mid kasta oo ka mid ah dalalka uu dhalashada ka haysto, waana in aan qof loo arkin in uusan haysan ilaalinta dalka uu u dhashay haddii, iyada oo aaney jirin sabab macquul ah oo tilmaaysa jiritaanka cabsi muuqata, uusan qofkaasi ilaalin ka doonan mid ka mid ah dalalkaa uu ka haysto dhalashada;

**Qodobka 12aad:**
**Aqoonsashada Koox, Qulqul Ballaaran iyo Ilaalin**
**Ku-meelgaar ah.**

1. Madaxa Hay'adda waxaa uu haddii uu u arko in shakhsiyaad koox gaar ah ay buuxinayaan Shuruudaha u-aqoonsashada qaxootinimada si waafaqsan Qodobka 10aad, waxa uu ku dhawaaqi karaa in shakhsiyaadka noocaas ah ay yihiin qaxooti loo qaateen ah xataa haddii codsi rasmi ah oo loogu aqoonsanayo xaaladdooda qaxootinimo aysan soo gudbin dhammaantood ama midkood.
2. Marka uu Madaxa Hay'adda soo saaro baaq waafaqsan faqradda (1), Madaxa Hay'addu waa in qoraal uu ku ogeysiinayo baaqa u soo saaro si hubineysa in ogeysiiska si sax ah loo war-gaarsiiyo ama lagu baraarujiyo, hay'adaha dowladda iyo kuwa aan dowlliga ahayn ee u habboon ee ka mas'uul ah arrimaha la xiriira magangelyo-doonka iyo qaxootiga, iyo shakhsiyaadka noocaas ah ee uu baaqu



JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA

khuseeyo.

3. Marka qof laga soo reebo dadka baaqa loo soo saaray si waafaqsan faqradda (1) kama reebeyso in qofkaasi uu Guddiga ka codsado in ay u aqoonsadaan qaxootinimo si waafaqsan Sharcigan.
4. Haddii ay dhacdo in dad badan oo magangelyo-doon ah ay ku soo qulqulaan Soomaaliya, waa in Madaxa Hay'adda uu isaga oo la tashanaya Wasiirka Arrimaha Gudaha, Federaalka iyo Dib-u- heshiisiinta, soo saaraa amar magangelyo-doonka u oggolaanaya in ay degaan soomaaliya iyaga oo ah shakhsiyaad ilaalin ku-meelgaar ah la siiyo iyada oo aan looga baahneyn in marka hore xaaladdooda qaxootinimo loo go'aamiyo si waafaqsan Qaybtan;
5. Baaqa loo soo saaro si waafaqsan faqradda (4) waxaa uu shaqeynayaa muddo laba sanadood ah oo ka bilaabata taariikhda la soo saaro baaqa, ama ilaa ay meesha ka baxdo sababta keentay qulqulka xooggan ee ay Soomaaliya kaga soo qulqulayaan dalka ay ka soo jeedaan ama caadi ahaan deggan yihiin shakhsiyaadka baaqa la soo saarey la xiriiro;
6. Joojinta ilaalinta ku-meelgaarka ah ee Madaxa Hay'adda bixiyey isaga oo raacaya faqradda (4) kama reebayso shakhsi ka mid ah kooxda magangelyo- doonka ah ee baaqu la xiriiro in uu Guddiga ka codsado in u oggolaado in qaxootimo loogu aqoonsado si waafaqsan Sharcigan;
7. Marka dad magangelyo-doon ah loo oggolaado in ay degaan Soomaaliya si waafaqsan faqradda (4), waa in ay shakhsi ahaan u yeeshaan dhammaan xuquuqaha iyo xoriyaadka, loolana dhaqmo si waafaqsan sida guud ee loola dhaqmo magangelyo-doonka iyo qaxootiga ee tilmaamayo Sharcigan;

## Qodobka 13aad:
## Dejinta Magangelyo-doonka iyo Qaxootiga

1. Madaxa Hay'adda waa in uu isaga oo la tashanaya Hay'adaha Dowladda, kuwa aan dowliga ahayn iyo Hay'addaha Caalamiga ah fududeeyaa in xarun qaabilaad ama xero la dejiyo qaxootiga loo wareejiyo magangelyodoonka ku soo qulqula Soomaaliya, waxaana xaruntaasi qaabilaadda ama xerada, haddii amniga qaranka iyo kala-dambeynta ay waajibineyso, waxaa laga dhigi karaa meel ka fog halka ay dalka ka soo galeen ama xuduudda, ama meesha uu Madaxa Hay'adda oo latashanaya bulshooyinka degaanka ee martigelinaya, uu go'aamiyo;
2. İyada oo aan wax loo dhimin macnaha guud ee foqradda (1) shakhsi magangelyo-doon ah waxaa uu si khiyaari ah u degi karaa xarun qaabilaad ama xero qaxooti;
3. Marka magangelyo-doon soo gudbiyo codsi uu ku doonayo in loogu aqoonsado qaxootinimo, inta la sugayo go'aanka laga qaadanayo codsigiisa, waxaa uu leeyahay xaqa xornimada dhaqdhaqaaqa, haddii aan loo xannibin sababo la xiriira amniga qaranka, kala-dambeynta ama caafimaadka guud ee dadweynaha;



JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA

## Qodobka 14aad:
## U-diididda Qaxootinimada

1. Waa in aan Qof loo siinin qaxootinimo si waafaqsan Sharcigan haddii qofka;

(b) Uu galay dembi ka dhan ah nabadda, dembi dagaal, ama dembi ka dhan ah bani'aadamnimada oo ku qeexan mid ka mid ah Shuruucda caalamiga ah ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya ay dhinac ka tahay, oo ay ku jiraan qodobbo ku saabsan arrimo la xiriira dembiyada noocaas ah;

(t) Uu dembi culus oo aan siyaasad ahayn ku soo galay dibadda Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya ka hor intii uusan iman oo aan Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya u aqoonsan magangelyo doon ama qaxooti ahaan;

(j) Uu dambi culus oo aan siyaasad ahayn ku galay gudaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, ka dib imaanshiyihiisa ama ku qaabilaadiisa Soomaaliya Qaxooti ahaan;

(x) Lagu helo in uu galay falal dembi ah oo ka dhan ah ahdaafta iyo mabaadi'ida Qaramada Midoobay ama Midowga Afrika; ama,

(kh) Isaga oo haysta dhalashada dalal mid ka badan, uusan ka raadsan ilaalin mid ka mid ah dalalkaa uu qofkaas ka haysto dhalashada, oo uusanna haysan sabab macquul ah oo ku saleysan cabsi muuqata oo ah in uu la kulmayo ciqaab, oo uu magangelyo uga soo doono Soomaaliya;

## Qodobka 15aad:
## Kala-noqoshada Qaxootinimada

1. Haddii Guddigu uu ku qanco in ay jiraan sababo macquul ah oo loo aamini karo in Qof loo aqoonsaday qaxooti ay ahayd in aan sidaa loo aqoonsan, ama ay meesha ka baxday qaxootinimadiisa si waafaqsan Sharcigan, Guddigu waxa uu waqti kasta, uu qofkaas kala noqon karaa qaxootinnimada;
2. Ka hor inta uusan qaadan go'aan ah in uu qaxootinimada uu qof ugala noqdo si waafaaqsan faqradda (1) Guddigu waa in: -

   (b) Qofka uu ogeysiiyaa ugu yaraan soddon maalmood ko hor in uu ku talo jiro in uu kala noqdo qaxootinimada; iyo

   (t) Qofka uu siiyaa fursad logu dhegeysto, oo uu ku soo bandhigo caddeyn ama macluumaad uu ku difaacayo qaxootinimadiisa ama eedeyn kasta oo kale oo isaga/iyada ka dhan ah;
3. Ka dib marka uu dhegeysto qofka ay la xiriirto kala noqoshada qaxootinnimada, Guddigu waa in uu go'aankiisa oo qoraal ah ku wargeliyo qofkaas, isaga oo la wadaagaya sababaha uu u cuskaday;
4. Qof kasta oo aan ku qancin go'aanka Guddigu gaaray si waaaqsan Qodobkan waxaa uu soddon maalmood oo ka bilaabato taariikhda uu helo ogeysiinta qoraalka ah ee go'aanka, rafcaan u qaadan karaa Golaha Rafcaanka.



JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA

## Qodobka 16aad:
## Ka-suulidda Qaxootinimada ee Xaaladaha Qaar

1. Qofku ma Sii ahaanayo qaxooti uu aqoonsan yahay Sharcigan haddii qofkaasi:-
   (b) Uusan u qalmin in loo aqoonsado qaxootinimo mid ka mid ah sababaha lagu sheegay Qodobka 14aad daraaddood;
   (t) Qaxootinimada loogola noqdo si waafaqsan Qodobka 15aad;
   (j) Si khiyaari ah uu diyaar ugu noqdo in uu ka faa'iideysto ilaalinta dalka uu haysto dhalashadiisa;
   (x) Ka dib markii uu horey u lumiyey u dhalashadii dal, uu si khiyaari ah dib ugu helo dhalashadii dalkiisa;
   (kh) Uu helo dhalashada dal kale, oo uu ilaalin ka helo dalka cusub ee uu dhalashadiisa helay;
   (d) Si khiyaari ah noloshiisa ugu dhiso dalkii uu ka soo tegey, ama dal dibadda ka ah oo uu ku negaaday, cabsi uu ka qabo dhibaateyn daraaddeed;
   (r) Aan loo Sii aqoonsan karin qaxootinimo maaddaama xaaladihii keenay in loo aqoonsado qaxootinimo ay meesha ka baxeen, laakiin uu weli diiddan yahay in uu ilaalin ka helo dalka uu dhalashadiisa haysto; ama;
   (s) markii uu lumiyey dhalashadii dal, uu diido in uu ku noqdo dalka uu horey si caadi ah uu u degganaa;

2. Xukunka faqradda (1) (s) waa in aan lagu xukumin qof sabab lagu qanci karo u hoysta in dhibaateyn horey loogu geystay daraaddeed u diidey in uu ka faa'iideysto ilaalinta dalkiisa, ama uu ku noqdo, hadba tii ay arrintu la xiriirto;
3. marka is-beddellada aasaasiga ah ee ay ka hadleyso faqradda (1) (r) ay ka dhacaan dalka uu dhalashadiisa haysto ama dalka uu horey si caadi ah ugu noolaan jirey qof qaxooti ah ama dad tilmaamo gaar ah wadaaga oo qaxooti ah oo magangelyo laga siiyey Soomaaliya, Guddigu waa in uu isaga oo kaashanaya Hay'adda Qaramada Midoobay ee Qaxootiga, uu daraaseyn iyo xaqiijin ku sameeyaa:
   (b) nooca is-beddellada; iyo
   (t) in is-beddelladu ay yihiin kuwo muddo gaaban soconaya ama ay yihiin kuwo waaraya;

4. Marka uu sameynayo daraaseynta isaga oo daba jooga faqradda (3), Guddigu waa in uu tixgeliyaa xaaladaha loo cuskaday bixinta u aqoonsoshada qaxootiga ama kooxda qaxootiga ah ee tilmaamaha gaarka ah wadaaga, midda ay tahayba;
5. Ka dib daraaseynta iyo xaqiijinta, Guddigu waa in uu, isaga oo kaashanaya Hay'adda Qaramada Midoobay ee Qaxootiga, go'aamiyaa;
   (b) In aqoonsiga qaxootinimo ee qofka qaxootiga ah ama kooxda dadka tilmaamaha gaarka ah wadaaga ee qaxootiga ah ee ay arrintu la xiriirto ay meesha ka baxayso islamarkiiba iyo in kale;
   (t) Haddii laga hadlayo koox dad qaxooti ah oo tilmamaamo gaar ah wadaaga,



JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA

sida xuquuqaha shakhsiyaadka qaxootiga ah ay u leeyihiin in codsiyadooda ay ku doonayaan qaxootinimada mid kasta gaarkiisa loo eego; iyo

(j) Cawaaqibka iyo waxyaabaha kaga imaan kara qaxootigc shakhsi ahaan amo koox shakhsiyaad tilmaamo gaar ah wadaaga oo qaxooti ah (midda ay tahayba) ee uu saameeyey go'aanka keenaya in laga noqdo qaxootinimodii loo oggolaaday;

## CUTUBKA 4AAD:
## XUQUUQAHA IYO WAAJIBAADYADA MAGANGELYO- DOONKA İYO QAXOOTIGA LA AQOONSADAY

### Qodobka 17aad:
### Xuquuqda Sinnaanta iyo Takoorid-la'aanta

1. Sharciga waa loo siman yahay, waxaana uu qof kasta xaq u leeyahay ilaalin sinnaan ku dhisan iyo in loo sinnaado waxtarka sharciga, iyada oo aan cidna lagu takooreynin sababaha lagu xusay faqradda (2).
2. İyada oo aan wax loo dhimin macnaha guud ee faqradda (1), magangelyo-doonka iyo qaxootiga waa in aan loo geysan takoor toos ah iyo mid aan toos ahaynba sabab kasta ha looga qiil dhigtee, haddii ay tahay da', sinji, midab, jinsi, naafanimo, gobol, dalka uu u dhashay, xubinnimo koox bulsho gaar ah ama fikir siyaasadeed;

### Qodobka 18aad:
### Xuquuqda soo gelidda, magangelyo-doonka iyo qaxootiga

1. Qof kasta oo buuxiyay shuruudaha ku xusan qodobka 11aad ee sharcigan wuxuu xaq u leeyahay in uu soo galo dalka, loona aqoonsadao magangliyo - doon mana jirto sifo sharci ah oo loogu diidi karo qaxootinnimada haddii:
   (b) Qofkaasi ay u badan tahay in uu halis u galo dhibaateyn ama jirdil loogu geysanayo sinjigiisa, diintiisa, dalka uu u dhashay, xubinnimadiisa koox bulsho oo gaar ah ama fikir siyaasadeed daraaddood; ama
   (t) Noloshiisa, amaankiisa jireed ama xorriyaddiisa, ay u badan tahay in, halis loo geliyo sababo la xiriira weerar uu dal kale ku soo qaaday, qabsasho, xukun shisheeye ama dhacdooyin kale oo carqaladeeya kala dambeyntii guud ahaan ama qayb kamid ah dalka uu u dhashay ama uu horey caadi ahaan u degganaa;
2. Inkasta oo ay jirto faqradda (1), haddana qof qaxooti ah ama magangeliyo- doon ah ayaa loo diidi karaa in uu soo galo Jamhuuriyadda Federaaka Soomaaliya, laga eryi karaa ama laga celin karaa Soomaaliya oo la geyn karaa dal kale, ama laga qaadi karaa tallaabooyin kuwaas la mid ah haddii ay jiraan sababo macquul ah oo uu ku qanci karo Wasiirka Arrimaha Gudaha kuwaas oo muujinaya in qofka magangelyo-doonka ama qaxootiga ah;



JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA

(b) Uu halis ku yahay amniga qaranka;
(t) Ay maxkamad awood u leh ku heshey dembi culus, iyo in go'aankii ugu dambeeyay iyo dembi-ku-helistaa aan rafcacn kale looga qaadan maxkamad iyada ka sarreysa; ama
(j) Dembiga lagu helay qofka magangeliyo-doonka ama qaxootiga ah, ee looga hadlay faqradda (t), uu yahay mid halis ku ah bulshada;

3. Marka uu go'aaminayo in qof magangeliyo-doon ama qaxooti ah uu halis ku yahay amniga qaranka iyo in kale, ama halis ku yahay bulshada, Wasiirka Arrimaha Gudaha waxaa uu tixgelin doonaa;
   (b) Mabaa'diida qawaaniinta caalamiga ah;
   (t) Shuruucda iyo protocollada caalamiga ah iyo kuwa goboleed ee qabanaya Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya iyo dalka qofka codsadaha ah lagu maxkamadeeyay laguna helay dembiga, la xiriira;
   (x) Xuquuqaha iyo xorriyaadka aasaasiga ah ee shakhsiga; iyo
   (kh) Kor-u-qaadidda iyo ilaalinta xuquuqaha magangelyo- doonka iyo qaxootiga;
   (d) Shuruucda Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya; iyo
   (r) Sharciga dalka uu qofka codsadaha ah lagu maxkamadeeyay laguna helay dembiga;

4. Qofka aan ku qancin go'aanka uu Wasiirka Arrimaha Gudaha qaatay si waafaqsan qaybtan waxaa muddo kow iyo labaatan maalmood ah oo ka bilaabata marka uu soo baxo go'aanka, waxa dibu-eegis ka codsan karaa inay ku sameyso Maxkamadda Sare ee heer Federaal;

## Qodobka 19aad:
## Xaqqa Magangelyo-doonka

1. Qofka magangelyo-doonka ah ee si waafaqsan Qodobka 8aad u soo codsada in loo aqoonsado qaxootinimo waxaa uu xaq u leeyahay in uu sii joogo Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya;
   (b) llaa Guddigu go'aan ka gaarayo codsigiisa; ama;
   (t) Haddii guuleysan waayo codsigiisa, illaa ay kaga dhammaanayaan dhammaan xalalka maamul iyo kuwa sharci ee arrintaas la xiriira;

2. Iyada oo aan wax loo dhimeyn sharci kasta oo qoran oo sheegaya taas beddelkeeda, qof kasta oo maganelyo-doon ah iyo dhammaan xubnaha qoyskiisa waxaa lagu dhaqayaa Shuruucda Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya;
3. Qof kasta oo magangelyo-doon ah waxa xaq u leeyahay; -
   (b) In la siiyo kaar aqoonsi oo ka markhaati-kacaya qaxootinimadiisa, iyo;
   (t) Waxbarasho

4. Xuquuqaha magangelyo-doonka ee lagu cayimey faqadaha (1) iyo (3) waxaa sidoo kale la siinayaa qoysaska magangelyo doonka ah;



JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA

## Qodobka 20aad:
## Xaqa Qaxootiga

1. Iyada oo aan wax loo dhimin sharci kasta oo qoran oo tilmaamaya taas beddelkeeda, ayaa qof kasta oo qaxootinimo loogu aqoonsado Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya dhexdeeda, iyo xubnaha qoyskiisa, waa in ay helaan xuquuqaha iyo xorriyaadka ay dhigayaan Shuruucda caalamiga ah ee la xiriira qaxootiga ee ay tahay in ay u hoggaansanto Soomaaliya;
2. Qof kasta oo qaxooti ah iyo xubnaha qoyskiisa (haddiiba uu leeyahay) waa in ay;
   (b) Helaan xuquuqda ah in ay sii joogaan Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya gudaheeda muddada loo aqoonsan yahay qaxootinimada oo tilmaamayo sharcigan;
   (t) La siiyo kaarar aqoonsi oo ka markhaati kacaya qaxootinimadooda;
   (j) La siiyo dokumenti Safar oo ay ugu safri karaan Soomaaliya dibaddeeda si waafaqsan mucaahaddooyinka iyo Heshiisyada ay tahay in ay u hoggaansanto Jamhuuriyadda Federaalka ee Soomaaliya; iyo
   (x) Waa in ay helaan xuquuqo kale, kana soo baxaan waajibaadyada kale ee ku xusan;

      (i) Qodobbada Heshiiska Qaramada Midoobay ee La Xiriira Qaxootinimada 1951,
      (ii) Borotokoolka La Xiriira Qaxootinimada, 1967, iyo;
      (iii) Heshiiska Ururka Midowga Afrika ee Lagu Maamulayo Arrimaha Gaarka u ah Dhibaatooyinka Qaxootiga Afrika jooga, 1969.

## Qodobka 21aad:
## Xuquuqaha Xubnaha Qoyska

1. Si waafaqsan qodobbada Sharcigan iyo sharci kasta oo kale oo qoran, xubnaha qoyska ee qofka qaxootiga ah waxa ay xaq u leeyihiin in ay sii joogaan Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya muddada qofka qaxootiga ah uu joogo Soomaaliya, waxaana ay yeelanayaan dhammaan Xuquuqaha iyo waxtarka kale ee uu helayo qofka qaxootiga ah;
2. Haddii xubin ka tirsan qoyska qofka qaxootiga ah uu Soomaaliya u sii joogo sababta ku xusan faqradda (1), oo uu qoyska uu ka tirsan yahay kaga baxo sabab Guur gaaridda da'da qaangaarka, ama ay meesha ka baxdo ku- tiirsanaantiisii qofka qaxootiga ah, waxaa uu isna xaq u leeyahay in uu Sii joogo Soomaaliya;
3. Haddii qof qaxooti ah ay kala tagaan xaaskiisa/ninkeeda, qof kasta oo waxyar ka hor geerida ama furriinka ku joogay Soomaaliya sababta ay tilmaameyso faqraddan isaga oo ah xubin ka tirsan qoyska qofka qaxootiga ah, qofkaas waxaa uu xaq u leeyahay in uu Sii joogo Soomaaliya;

## Qodobka 22aad:
## Ilaalinta Gaarka ah ee ay Helayaan Dadka Nugul

1. Hay'addu waa in ay qaaddaa tallaabooyinka ay u aragto in ay lagama maarmaan u yihiin in la ilaaliyo xuquuqaha magangelyo-doonka iyo qaxootiga si waafaqsan Sharcigan iyo Shuruucda kale ee Dalka iyo qawaaniinta Cadamiga ah ee xuquuqaha aadanaha ee ay tahay in ay u hoggaansanto Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya;
2. Iyada oo gudanayso waajibaadyada uu saarayo Sharciga, Dowladda Federaalku waa in ay dadaal gaar ah ku bixisaa ilaalinta danaha Dadka nugul, oo ay ka mid yihiin haweenka, carruurta aan la wehelin iyo kuwo oy kala maqan yihiin qoyskoodu, waayeelka, shakhsiyaadka naafada ah iyo Dadka kale ee nugul ee leh baahiyo gaar ah oo u baahan in la ilaaliyo.

## Qodobka 23aad:
## Dib-u-celin Khiyaari ah

Qof kasta oo magangelyo-doon ama qaxooti ah waxaa uu xaq u leeyahay in uu si iskiisa ah u doonto dib-u-celin si khiyaari ah looga celinayo Soomaaliya laguna celinayo dalkii uu dhalashadiisa haysto ama uu horey caadi ahaan u degganaa si ammaan ah oo sharaf ku dheehan tahay.

## Qodobka 24aad:
## Waajibaadyada Magangelyo-doonka iyo Qaxootiga

Qofka magangelyo-doonka ama qaxootiga ah waxaa waajib ku ah in uu ixtiraamo uuna u hoggaansamo shuruucda Dalka iyo xeer-nidaamiyeyaasha waqtigaa dhaqangalka ka ah Soomaaliya, iyo in u hoggaansmao Shuruucda caalamiga ah ee qabanaya Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.

## Qodobka 25aad:
## Dal-ka-cayrinta Qaxootiga Marka ay Jiraan Xaaladaha Qaar.

1. Iyada oo aan wax loo dhimin sida guud ee u hadlayo Qodobka 18aad, qof qaxooti ah oo si sharci ah ku deggan Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya waa in aan laga cayrin dalka marka laga reebo sabab la xiriirta amniga Qaranka iyo nidaamka dalka;
2. Go'aanka dalka looga cayrinayo qof qaxooti ah iyada oo la dabajoogo faqradda (1) waxaa gaaraya Wasiirka Arrimaha Gudaha, Arrimaha Federaalka iyo Dib-u-heshiisiinta, iyada oo lala tashanayo Madaxa Hay'adda waana in uu gaaraa si waafaqsan qawaaniinta dalka, kuwa caalamiga ah iyo mabaa'diida guud ee tallaabo-qaad maamul oo xaq ku dhisan;
3. Marka ay joogto faqradda (2), iyo ka hor inta uusan gaarin Wasiirka Arrimaha

Gudaha go'aanka la xiriira Qodobkan, waa in qofka magangleyo doonka ah ama qaxootiga ah ee uu go'aanku la xiriiro siiyaa fursad ku soo bandhigo kiiskiisa, uuna kaga jawaabo eedeymaha isaga ka dhanka ah ee loo soo jeediyay;

4. Qof kasta oo aan ku qancin go'aanka Wasiirka Arrimaha Gudaha gaaray si waafaqsan Qodobkan waxaa uu rafcaan u qaadan karaa Maxkamadda Sare, marka la codsado in dib-u-eegis lagu sameeyo go'aanka, waa in la hakiyaa fulinta go'aankii wasiirka illaa Maxkamadda ay ka gaarto go'aan kama- dambeys ah iyada oo Maxkamaddu ay soo saareyso laba middood;
   (b) In ay adkeyso go'aanka lagu ceyrinayo qofka qaxootiga ah; ama
   (t) In ay buriso go'aanka lagu ceyrinayo qofka qaxootiga ah, oo ayna amar ku bixiso in la aqoonsado qaxootinimadiisa;
5. Maxkamaddu waxa ay, iyada oo ka duuleysa codsiga uu soo gudbiyey qofka laga soo saarey amar lagu ceyrinayo, waxa ay joojin kartaa fulinta amarka muddo ay Maxkamaddu u aragto in ay caqli-gal tahay si qofka qaxootiga ah loo siiyo waqti uu ku raadsado dal kale oo uu tegi karo oo aan ahayn dalka la doonayo in lagu celiyo.

### Qodobka 26aad:
### Xabsi-ku-hayn Ku-meelgaar ah Muddada La Sugayo Cayrinta

1. Qofka ceyrintiisa laga soo saaray amar waafaqsan Qodobka 25aad waa la soo qaban karaa waana la xiri karaa marka uu amar ka soo saaro Madaxa Hay'adda ka hor inta aan la cayrin haddii Madaxa Hay'addu uu fikirkiisu yahay;
   (b) In la soo qabto Lana xiro qofka qaxootiga ah haddii ay lagama maarmaan u tahay fulinta cayrinta; ama
   (t) Haddii aan la soo qaban Lana xirin, in qofka qaxootiga ah halis ku noqonayo amniga qaranka ama kala-dambeynta.

## CUTUBKA 5AAD: GUDDIGA GO'AAMINTA QAXOOTINIMADA
### Qodobka 27:
### Dhisidda iyo Xubnaha Guddiga

1. Waxaa la dhisayaa Guddi loo yaqaanno Guddiga Go'aaminta Qaxootnimada oo ka kooban Sagaal (9) xubnood oo ay seddex (3) dumar tahay waxayna noqonayaan sidan soo socta:
   (b) Guddoomiyaha Hay'adda Qaxootiga iyo Barakacayaasha Qaranka, oo noqonayana guddooomiyaha Guddiga.
   (t) Wakiil ka socda Hay' adda Qaxootiga iyo Barakacayaasha Qaranka oo noqonaya Xoghaynta Guddiga.
   (j) Wakiil ka socda Wasaaradda Arrimaha Gudaha, Federaalka iyo Dib-u-heshiisiinta

(x) Wakiil ka socda Xafiiska Garyaqaanka Guud ee Dowladda JFS.
(kh) Wakiil ka socda Wasaaradda Amniga Gudaha.
(d) Wakiil ka socda Wasaaradda Arrimaha Dibadda
(r) Wakiil ka socda Hay'adda Socdaalka iyo Jinsiyadda
(s) Wakiil ka socda Wasaaradda Caddaaladda; iyo
(sh) Wakiil ka socda Taliska Ciidanka Booliska Federaalka.

2. Wasiirka Arrimaha Gudaha iyo Federaalka wuxuu soo Magacaabayaa Guddiga marka uu helo soo jeedinta Guddomiyaha Hay'adda.
3. Wakiil ka socda Hay'adda Qaramada Midoobay ee Qaxootiga ayaa lagu martiqaadi karaa in uu noqdo xubin Goobjoog ka ah kulamada guddiga.

## Qodobka 28aad:
## Hawlaha Guddiga

Hawlaha guddiga waxaa ka mid ah:

1. Kormeeridda iyo go'aaminta aqoonsashada qaxootinimo ee shakhsiyaadka Soomaaliya ku ah magangelyo-doon iyo qaxootiga si waafaqsan Sharcigan,
2. Go'aaminta dhammaan codsiyada u-aqoonsashada qaxootanimada, isaga oo awood u leh in uu;
3. In uu kuwa soo codsada u aqoonsado qaxootinimo; ama uu diido codsiga;
4. Go'aanno ka qaato arrimaha la xiriira;
   (b) Kala noqoshado u-aqoonsiga qaxootinimada iyo cayrinta qaxootiga;
   (t) Tixgelinta iyo go'aan-ka-qaadashada codsiyada dib-u-midoobidda qoyska ee ay soo codsadaan shakhsiyaadka qaxootinimo loogu aqoonsaday Soomaaliya si waafaqsan Qodobka 20aad;
5. Uu Madaxa Hay'adda kala taliyo arrimaha la xiriira qaxootiga, oo uuna muddo kadibba warbixinno u soo gudbiyo Madaxa hay'adda ugu yaraan sanadkiiba mar;
6. Qabto hawlaha kale ee uu Madaxa Hay'adda ugu xilsaaro si waafaqsan Sharcigan ama sharci kasta oo kale ee dhaqan-galay;
7. Marka ay qabanayaan hawlaha, shirarka, shaqooyinka iyo arrimihiisa kale waa in Guddigu u qabtaa si waafaqsan Xeer-nidaamiyeyaasha;

## Qodobka 29aad:
## Go'aamada iyo Hadal-qoraallada Guddiga;

1. Marka uu gudanayo hawlihiisa, Guddigu waa in uu u hoggaansamaa habraaca uu dhigayo Sharciga, iyo Xeer-nidaamiyeyaasha;
2. Iyada oo aan wax loo dhimin macnaha guud ee faqradda (1), Guddigu waa in uu hubiyaa in dhammaan habraacyada loogu talo galay si buuxda ay u ilaaliyaan saraakiisha ay hawshoodu tahay, in;
   (b) Codsade kasta la siiyo fursad macquul ah oo ku soo gudbiyo kiiskiisa/keeda;
   (t) Turjumaan aqoon u leh, luuqad uu fahmayo codsadaha, joogo mid kasta oo

ka mid ah dhammaan marxaladaha dhegeysiga;

(j) Go'aamada la xiriira qaxootinimada in loo qaato si waafaqsan qodobbada Sharcigan iyo sharci kasta oo kale oo dhaqan-gal ah;

(x) Kiis kasta oo loo soo gudbiyo Guddiga waa in go'aan looga gaaro iyada oo aan lala daahin, haddii ay si kasta wax u dhacaan, waa in go'aan looga gaaro sagaashan maalmood oo ka bilaabata maalintii codsiga loo soo gudbiyey Hay'adda;

(kh) codsadaha waxaa qoraal lagu ogeysiinayaa;

i. Natiijada codsigiisa ama codsigeeda;
ii. Haddii codsiga la diidana, sababaha go'aankaa looga qaatey;
iii. Habraaca rafcaan looga qaadan karo go'aanka; iyo,
iv. Muddada ay tahay in rafcaan looga qaato;

(d) Galalka kiisaska go'aan ka-qaadashada qaxootinimada waxaa ay ahaanayaan sir oo cidna lalama wadaagi karo iyada oo aan oggolaansho qoraal ah laga helin qofka qaxootiga ah; iyo

(r) Hay'adda Qaramada Midoobay ee Qaxootiga ayaa lagu martiqaadayaa si ay korjoogto uga noqoto kulammada Guddiga Go'aaminta qaxootinimadda;

3. Diiwaannada iyo hadal-qoraallada kulamada Guddiga waa in ay ahaadaan sir laguna hayaa meel amaan ah, waana in la qaadaa dhammaan tallaabooyinka lagama maarmaanka ah ee lagu hubinayo in aan halis la gelin amniga magangelyo-doonka;

## CUTUBKA 6AAD: GOLAHA RAFCAANKA QAXOOTIGA

### Qodobka 30aad:

### Dhisidda iyo Xubnaha uu ka Kooban Yahay Golaha Rafcaanka

1. Waxaa la dhisayaa Gole Rafcaan oo loo yaqaanno Golaha Rafcaanka Qaxootiga oo hawshiisu ay tahay in uu dhageysto oo uu go'aan ka qaato rafcaannada loo qaato si waafaqsan Sharcigan;
2. Racfaanka waa in uu ka koobnaadaa guddoomiye iyo ugu yaraan afar xubnood oo uu soo magacaabayo Wasiirka Arrimaha Gudaha iyo Dib- uheshiisiinta kadib marka uu helo soo jeedinta Madaxa Hay'adda, Waxaana ansixinaya Golaha Wasiirada;
3. Xubnaha Golaha Rafcaanka loo magacaabay si waafaqsan faqradda (2) waa in ay ka koobnaadaan shakhsiyaad aqoon iyo waayo-aragnimo u leh sharciga qaxootiga, socdaalka, arrimaha dibadda, amniga qaranka, maamulka degaanka, xuquuqaha aadamaha iyo arrimaha qaxootiga, laakiin waa in aan xubin ka tirsan Guddiga aan loo magacaabin in ay ka mid noqoto Golaha Rafcaanka;
4. Golaha Rafcaanka waa in, marka ay gudanayaan hawlahooda ku xusan Sharcigan, ay ahaadaan kuwo dhexdhexaad ah oo madax-bannaan, waa in aaney shakhsi ama maamul kale ka amar qaadan;



JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA

## Qodobka 31aad:
## Hawlaha iyo Awoodaha Golaha Rafcaanka

1. Hawlaha Golaha Rafcaanka waa inuu dhegeysto oo uuna go'aamiyo rafcaannada laga soo qaato go'aamada Guddiga.
2. Markago'aan ka qaadanayo rafcaan loo keenay Golaha; Rafcaanka, Golaha Rafcaanka waxaa uu;
   (b) Ku raaci karaa go'aankii Guddiga;
   (t) Laali karaa go'aanka Guddiga, hadba sida ay xaaladdu tahay waxaana uu arrinta dib ugu celin karaa in mar kale la tixgeliyo; ama
   (j) Fari karaa in arrinta mar kale la dhageysto oo go'aan laga qaato;

3. Golaha Markuu soo gaaro racfaan lasoo qaatay waa inuu dedejiyaa Go'aan ka gaarista racfaankaas muddo aan ka badneyn sagaashan cisho;
4. Awoodda golaha racfaanka wuxuu ku egyahay go'aan ka gaarista racfaanka loo soo qaatay si waafaqsan sharcigan;
5. Golaha racfaanka waa inay qoraal ku gaarsiiyaan racfaanlaha sababaha ay ugu raaceen go'aankii guddiga ama ay ugu khilaafeen si waafaqsan sharcigan;
6. Haddii aan lagu sheegin Sharcigan ama Xeer-nidaamiyeyaal, waa in Golaha Rafcaanku uu nidaamsadaa habraaciisa;
7. Golaha racfaanka haddii ay uga baahdaan hay'adda Qaxootiga ee qaramadda midoobay talo, waxay kasoo qayb gelin karaan fadhiyadooda;

## Qodobka 32aad:
## Dib-u-eegis Garsoor

1. Qof kasta oo aan ku qancin go'aanka Golaha Rafcaanka waxaa uu muddo soddon maalmood gudahood ah go'aanka arrimaha sharciga la xiriira oo kaliya uu rafcaan ugu qaadan karaa Maxkamadda Sare ee Heer Federaal, go'aanka Maxkamadda ayaana ah kama-dambeys,
2. Maxkamaddu waxaa ay awood u leedahay in ay dhageysato ayna go'aamiso arrimaha lagu xusay Qodobbada 31, 32 iyo 33 ee Heshiiska La Xiriira Qaxootinimada, 1951.

## CUTUBKA 7aad:
## QODOBBO QUBANE AH
## Qodobka 33aad:
## Shuruucda Aan Loo Adeegsan Karin

Sharci, xeer-nidaamiye, amar iyo tilmaan kasta oo aan la jaanqaadi Karin Sharcigan looma adeegsan karo arrimaha uu xeer ka dejiyay Sharcigan.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE

## Qodobka 34aad:
## Xeer-nidaamiye Maamul.

1. Wasiirka Arrimaha Gudaha ayaa soo **saaraya** Xeer-nidaamiye Maamul oo waafaqsan sharcigan kadib marka uu helo soo jeedinta Madaxa Hay'adda, si loogu dhaqan-geliyo qodobada sharcigan.
2. Iyada oo aan wax loo dhimin sida guud ee ay u hadlayso faqradda (1), Xeernidaamiyeyaasha laga soo saaro Sharcigan waxaa ay xeerin doonaan, arrimo ay ka mid yihiin —
   (b) Habraaca loo marayo rafcaanka iyada oo laga faa'iideysanayo Xuquuda rafcaanka ee uu ka hadlayo Sharcigan;
   (t) Habraacyada Guddiga Go'aan-ka Gaarista kiisaska Qaxootinimada;
   (j) Habraacyada Golaha Rafcaanka iyo habraacyada rafcaanka;
   (x) Qaabka iyo habraaca loo soo codsanayo iyo habraaca loo tixgelinayo codsiyada qaxootinimada;
   (kh) Dhisidda guddiyada, iyo u-xilsaaridda guddiyadaas ee hawlaha la xiriira qaabilaadda, daryeelka iyo waxtaridda qaxootiga;
   (d) Qaabka iyo sida aqoonsi iyo dokumentiyada safarka loogu sameynayo qaxootiga iyo xubnaha qoysaskooda;
   (r) Qaabka uu noqonayo amar ama ogeysiis kasta oo loo baahan yahay in qaxootiga loo siiyo si waafaqsan Sharcigan;
   (s) Habraaca ilaalinta Iyo dhexgelinta qaxootiga ee bulshooyinka martigelinaya si loo gaaro xalal waara, isku-tiirsanaan iyo isku-filnaansho ay gaaraan qaxootiga; iyo
   (sh) llaalinta haweenka, carruurta aan la wehelin, dadka naafada ah iyo kooxaha kale ee liita ama nugul.
   (dh) In ay ku qeexnaataa xadigga qaxooti ee uu qaadan karo dalku iyo muddada qofka qaxootiga ah uu dalka joogi karo, sidoo kale dalalka qaxootigooda la aqbali karo iyo dalalka qaxootigooda aan la aqbali Karin.

## Qodobka 35aad:
## Baabi'in

Sharcigan waxaa lagu baab'inayaa dhammaan Shuruucda iyo xeerarka ka horimaanaya ee dhaqan galka ka ahaa Dalka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.

## Qodobka 36aad:
## Dhaqan-galka Sharcigan

Sharcigan waxa uu dhaqangalayaa marka uu ansixiyo Baarlamaanka Federaalka Soomaaliyeed, isla markaana uu saxiixo Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Dowladda.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA